

Irbadda 2-aad ee 12 ilaa 15 jirka oo laga fiirsanayo.

Laga soo bilaabo bishii Sebtember waxa 12 ilaa 15 jirka loo fidiyay hal irbad oo ah tallaalka koroonaha. Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) ayaa qiimayn ku sameeyay in loogu dari karo irbadda 2-aad, laakiin wuxu soo jeedinayaa in la sugo ilaa inta la helayo aqoon dheeraad ah. FHI ayaa qiimayn cusub samayn doona bilowga 2022.

FHI waxa uu gartay in aanay xilligan jirin waxyaalo keenaya in irbadda labaad ee tallaalka loo fidiyo dhallinyarada dhalatay 2006-2009. Waxa arrintan lagu sababeeyay in ay yar tahay halista ay dhallinyaradu ugu jiraan in ay aad ugu xanuunsadaan cudurka. Ka difaacnaanta xanuunka daran ayaa gaadha ilaa iyo 85 % marka la qaato hal irbad oo tallaalka ah, islamarkaana waxa qofku uu difaacan yahay ugu yaraan 16 toddobaad. Maadaama tirada dhallinyarada dhalatay 2006-2009 ee covid-19 ku dhaco ay ka yar tahay tirada dhallinyarada ka waaweyn ee cudurku ku dhaco, waxaan jirin sabab weyn oo labo irbadood loo siiyo dhallinyaradan si loo yareeyo faafidda cudurka.

Irbadda labaad ee tallaalka ayaa sida kalena wadata halis dheeraad oo ku saabsan in caabuuq ku dhaco bacda wadnaha iyo muruqa wadnaha, oo inta badan ku dhaca ragga dhallinyarada ah iyo wiilasha. Falanqaynno lagu sameeyay waddamada Woqooyiga Yurub (Noordiga) ayaa wakhtiyada soo socda laga heli doonaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan halistan.

Bilowga 2022 ayaa FHI uu samayn doonaa qiimayn cusub oo lagu salayn doono aqoonta ugu dambaysa ee ku saabsan waxyeellooyinka waaweyn ee tallaalka, heerarka cudurku maro marka uu qofka ku dhaco iyo sida xaaladda guud tahay, ka hor intaan la soo jeedin in irbadda labaad la siiyo ama aan la siinin dadka jira da'aadka la soo sheegay. 70 % 12-15 jirka ayaa qaatay hal irbad. Kooxda jirta 12-15 sano qiyaastii waa 260 000 qof, ama 4,8 % oo dadweynaha ah. Saddex

kooxood ayaa ka tirsan yihiin dugsiiga dhexe (2008, 2007 iyo 2006), hal kooxna waxay ka tirsan tahay dugsiiga hoose (2009).